

## **Haddii aad ka shakisan tahay in uu kugu dhacay korona fayras, sidan sameey:**

Astaamaha korona fayras waxay noqon karaan, qufac, hergab, dhuun xanuun, qandho, madax xanuun, neefta oo ku qabato, shuban iyo dhadhanka iyo urka uu kaa tagaan. **Haddii aad aragto qaar kamid ah astaamaha aan soo sheegnay kula xiriir taleefan laanta adeegga caafimaadka:**

- **Wac** laanta daryeelka caafimaadka shaqada ee xaruntaada caafimaad ama Lambarka latalinta adeegyada caafimaadka ee ah 03 5657 0023 (maalin kasta saacadda 7 - 22). Dadka maqalka iyo aragga naafada ka ah, waxay fariin ku diri karaan Lambarka latalinta adeegyada caafimaadka ee ah 040 639 7700 (maalin kasta saacadda 7 - 22)
- Inta ay xirantahay qeybta adeegyada caafimaadka waxaa la xiriirtaa isbitaalka jaamacadda ee tays, Lambarka latalinta koronaha 03 3116 5333.
- Xaaladaha degdega waxaad wacdaa 112.
- Taleefanka waxaa laguugu siin doonaa macluumaad sax ah.

**Fiiro gaar ah!** Haddii aad leedahay astaamaha caabuqa neef mareenka, fadlan ha tagin xarumaha caafimaadka ama xarunta gargaarka degdega ee wac marka hore taleefankooda, si aadan u qaadsiin xanuunka dadka kale.

**Haddii la xaqiiyay in uu ku haleelay xanuunka korona fayras,** waxaa lagu amraayaa in aad noqoto go'doon. Talooyinka lagu siiyay u hogaansan. Go'doon waxaa ku ahaan kartaa tusaale ahaan gurigaaga, iyadoo ay kula noolyihiin reerkaaga, marti kuma soo booqan karto. Haddii xaaladaada caafimaad xumaato, wac taleefanka lagu siiyay. Go'doominta waxay qaadaneysaa ugu 7 maalmood, balse waxaa go'doon ahaan doontaa inta astaamaha xanuunka dilaaga ah ay jiraan, kadib 1-2 maalmood oo xanuun la`aan ah ayaad si sugeysaa si loo hubiyo. Go'doominta iskaaga uma joojin kartid, ee kala tasho shaqaalaha caafimaadka ee ku takhasusay cudaradda faafa.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan korona fayras oo luqado badan ah waxaad ka helaysaa boggaan [thl.fi/coronavirus](http://thl.fi/coronavirus)

